

Is-Baadhitaanka COVID-19 ka

Laga bilaabo Isniinta 12ka Abril, Ardayda Lyceum ee ku sugan goobaha kala duwan ee dalka ayaa soo laaban doona.

Ka hor inta aanay tagin fasaladooda usbuuc kasta, damaan ardaydu waa in ay ku sameeyaan laba is baadhitaan guriga. Natijada baaditaanka koobaad waa in loo keenaa iskuulka Isniin kasta, natijada baadhitaanka labaadna Salaasa kasta. Baadhitaanadaa la'aantood, ma suurto galitdoonto in laga soo xaadiro fasalka ardaydana waxa loo calaamadin doonaa maqnaansho. Iskuulada baahiyaha gaarka ah, mas'uuliyiintu waxay ku talinayaan in la sameeyo iska baadhitaanka xaanuunkaas laakiinse qasab ma'aha.

Halkee ka heli karaa is-baadhitaanka?

Farmashiyaha! Ardayda qaangaarka ah (ka weyn 18 sano) waa la siin doonaa is-baadhitaanka iyagoo keenaya AMKA (Lambarka Amniga Bulshada ama Sooshiyaal Sikiyuuriti), PAMKA (Ku-meelgaarka AMKA) ama PAAYPA (Caymiska Ku-meelgaarka ah iyo Lambarka Daryeelka Caafimaadka), iyo sidoo kale dukumiinti aqoonsi (tusaale: Kaar Magangalyo, Rukhsada Deganaanshaha). Ardayda da'doodu ka yar tahay 18 sano, waalidiinta / dadka ardayda ka masuulka ka ah ayaa la siin doonaa is-baadhitaanka iyaga oo keenaya ardayga AMKA hiisa, PAMKA hiisa ama PAAYPA hiisa iyo sidoo kale dukumeentiga aqoonsiga ee iyaga u gaar ka ah (waalidka / wakiilka). Haddii ay dhacdo inaad haysan AMKA, PAMKA ama PAAYPA, ama dhibaatooyin aad la kulantay, booqo mid ka mid ah adeegyada dadweynaha ee liistadan:

<https://self-testing.gov.gr/eody-stathera-simeia.pdf>.

Toddobaadyada soo socda, arday kastaa wuxuu xaq u leeyahay 4 is-baadhitaan (2 is-baadhitaank asbuucii).

¹¹ Si aad u ogaato PAAYPA-daada, fadlan booqo bogga rasmiga ah: <https://www.amka.gr/have-paaypa/> (waxaa ka heli kartaa dhowr luqadood). Si aad u ogaato AMKA-daada, fadlan gal bogga rasmiga ah: <https://www.amka.gr/AMKAGR>. (Af Giriig kaliya)

Sidee U Sameeyaa Is-Baadhitaanka?

Halkan waxaad ka helaysaa fiidyow ku saabsan qaabka loo sameeyo is-baadhitaanka:

<https://www.youtube.com/watch?v=uqy9EtE1uuE> (Af Griig).

Waxaad isdoo kale ka codsan kartaa caawimo shaqaalaha caafimaadka, farmashiistaha, ama shaqaale bulsheed aad taqaan. Ardayda Lyceum ee ka weyn da'da 18 sano iyaga ayaa is-baadhitaanka iska qaadi kara. Ardayda 13 sano ka weyn iyaga ayaa iska qaadi kara ilaa inta ay kormeerka waalidkood ama mas'uuliyiintooda ku jiraan.

Maxay tahay in aan sameeyo ka bacdi marka aan is-baadhiitaanka COVID-19 ka dhameeyo?

Marka aad is-baadhitaanka COVID-19 samayso waxaad u baahantahay in aad ugu dawaaqdo sida soosocota:

1. waxaad gashaa barxada onlineka ah ee self-testing.gov.gr kana dooro:

***Kaarka Iskuulka ee COVID-19:** Ku dhawaaqida natiijooyinka bixinta kaarka dugsiga ee waalidiinta / dadka ardayda ka masuulka ah iyo ardayda qaangaarka ah. Buuxi qeybta xogta shakhsiga ah ka dibna soo gudbi natiijada is-baadhitaanka si laguugu soo saaro xaqiijin rasmi ah.*

2. Haddii aad tahay waalid / ilaaliye arday magangelyo-doon ah, waxaad u oggolaan kartaa maamulaha dugsiga ama isku-duwaha waxbarashada qaxootiga inay galaan barxada self-testing.gov.gr aanay u soo saaraan kaarka COVID-19 ka ee iskuulka ardayga.

Maxaan Sameeyaa Marka Natiijada Is-Baadhitaanka La Soo Saaro Ama La Shaaciyo?

Haddi badhitaanka ka bacdi lagaa helo xanuunka, waa in la guu soo saaraa kaar iskuul oo sheegaya in lagaa helay xanuunka waana in badhitaan (labaad) lagu sameeyaa ama lagaa qaadaa 24 sacadood gudahood.

Waxaad badhitaan labaad ka samayn kartaa mid ka mid ah hay'addaha dowliga ah ee laga heli karo halkan: <https://self-testing.gov.gr/eody-stathera-simeia.pdf>.

Hay'adaha dowladeed waxay shaqeeyaan inta lagu gudo jiro saacadaha subaxii, Isniinta ilaa Jimcaha (saacadaha furitaanka eeg liiska kore).

Si aad u samayn kartid badhitaanka labaad waa in aad haysataa xaqiijinta rasmiga ah ee aad ka heshay barxada self-testing.gr ee muujinaysa in lagaa helay xanuunka. haddii badhitaanka labaadna lagaaga helo xanuunka, ardayga iyo inta ku dhow waa in is karantiimeeyaan iyadoo la raacayo tilmaamaha Ururka Caafimaadka Dadweynaha Qaranka (EODY).

Haddi badhitaanka labaad lagaaga waayo xanuunka, xaqiijinta natiijoda baadhitaanka ayaa lagu siin doonaa adiga.

Ka maqnaanshaha iskuulka lama tixgalin doono haddii aad keento cadaynta baadhitaanka labaad. Haddii natiijada baaritaanku keento ama soosaarto "Sax Maaha", booqo mid ka mid ah hay'adaha dowliga ah ee kor ku xusan.

Iska jir! ku tuur is-baadhitaanka goobta ama dambiishka qashinka. Haddii natiijadu sheegto in xanuunka aad qabtid ku duub is-baadhitaanka laba bacoood oo qashin inta aanad qashinka kale ku tuurin!

Is-baadhitaanka dib looma isticmaali karo mana aha in bulaacadaha lagu qubo.